Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Hirshabelle
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
ولاية هيرشبيلي
وزارة المالية والتنمية الاقتصادية

Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State of Somalia
Ministry of Finance & Economic Development

## Xafiiska Wasiirka

**Taariikh: 15 July 2021**

**Miisaaniyadda DGHSH ee Muddada u dhaxaysa 1$^{da}$ Jannaayo ilaa 31$^{ka}$ Disembar 2022**

**Mudane Wasiir,**

Wasaaradda Maaliyadda ee **DGHSH** waxaa ay idinku wargelineysaa in geeddi-socodka diyaarinta miisaaniyadda sanad-maaliyadeedka dhammaanaya **31$^{ka}$ Disembar 2022.** Sidaa daraaddeed waxaa dhammaan wasaaradaha laga codsanayaa in ay ogaadaan in miisaaniyaddooda ugu badan ay tahay sida ku qoran **Lifaaqa 1** ee ku lifaaqan wareegtadan iyo in ay soo gudbiyaan qiyaasaha kharashaadka ay u baahan doonaan muddada u dhaxaysa **1$^{da}$ Jannaayo** ilaa **31$^{ka}$ Disembar 2022$^{ka}$.** Miisaaniyadaha ayaa loo qoondeyn karaa xisaab kasta oo miisaaniyadeed laakiin miisaaniyadda Wasaaraddu waa in aaney ka badan miisaaniyadda ugu badan ee loo qoondeeyey. Kharashaad kale oo intaa ka badan oo la soo jeedinayo waa in gooni loo soo qoraa waana in faahfaahinta loogu qiilsameyo kharashaadka cusub laga bixiyaa, eeg **Foomka 6aad.**

Sida ay tilmaameyso Qaybta **23aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha**/Dowladda ee soo baxay **2018,** Wasaaradaha ayaa hadda laga doonayaa in Qorshe-sanadeedka Dakhliga iyo Kharashaadka u soo gudbiyaan Wasiirka Maaliyadda ugu dambeyn **30 maalmood** ka hor ka dib marka miisaaniyadda soo-jeedinta ah loo gudbiyo Baarlamaanka. Qorsheyaashani waxaa ay u qoran yihiin qaab bille ah taas oo gacan ka geysaneysa saadaasha/odoroska lacagta kaashka ah ee soo galeysa iyo tan ka baxaysa **DGHSH** oo sidoo kalena sal u noqoneysa miisaaniyadda loo qoondeynayo Wasaarad iyo Hay'ad kasta. Qorshahani ayaa la soo diri doonaa goor dambe oo ka mid ah muddada miisaaniyad-diyaarinta.

Codsiyada miisaaniyadeed ee la soo gudbiyo waxaa qiimeyn doona Wasaaradda Maaliyadda, oo la tashaneysa Wasaarad kasta, iyada oo lagu xisaabtamayo qiyaasta dakhliga la saadaalinayo in la helo. Codsiga Foomka 6aad iyo wadarta miisaaniyadda la soo jeedinayo.

Wareegtadan Miisaaniyadeed ee halkaan ku lifaaqan waxaa ay macluumaadka ay u baahan tahay ku hageysaa Wasaaradda Maaliyadda. Wareegtada Miisaaniyadda waxaa la socda foomamka loo adeegsanayo soo-gudbinta qiyaasaha miisaaniyadda. Foomamka waa in loo diyaariyaa si waafaqsan tilmaamaha ay bixinayso wareegtadan waana in loo soo gudbiyaa Wasiirka Maaliyadda ugu dambeyn **31$^{ka}$ Agoosto 2018**.

Maaddaama dakhliga soo gala **DGHSH** uu xaddidan yahay. Wasaaradaha waxaa laga codsanayaa in marka ay soo gudbinayaan miisaaniyadahooda ay ku soo sheegaan sida ay kharashaadkooda ugu kala muhiimsan yihiin. Go'aanka ugu dambeeya ee la xiriira Miisaaniyadda **DGHSH** ee **2022$^{ka}$** waxaa qaadanaya Baaramaanka **DGHSH.**

Fadlan la soo xiriir Waaxda Miisaaniyadda, Telefoonka **0615497987**, Wasaaradda Maaliyadda haddii aad u baahato gacansiin.

**Saaxiibkaa daacadda ah,**

**Mohamed Mohamud Abdulle**
**Wasiirka Wasaarada Maaliyadda &Horumarinta Dhaqaalaha**
**Dowlad Gobaleedka Somaaliyeed ee Hirshabeele**

# Wareegtada Miisaaniyadda 2022/DGHSH/MOF/1

## Diyaarinta miisaaniyadda muddada u dhaxaysa 1$^{da}$ Jannaayo ilaa 31$^{ka}$ Disembar 2022$^{ka}$

Wareegtada Miisaaniyadda waxaa loogu talogaley in ay Wasaaradaha iyo Hay'adaha/Wakaaladaha ay ka caawiso in ay fahmaan mas'uuliyaddooda ku aaddan diyaarinta Miisaaniyadda.

Wareegtadan waxaa ay Wasaarad iyo Hay'ad/Wakaalad kasta ku waajibinaysaa in ay soo gudbiso maclumaad la xiriira khrashaadka soo noqnoqda iyo kan hantida lagu soo iibsanayo, faahfaahinta shaqaalaha ay qorsheynayso in ay la shaqeeyaan, iyo mashruuc horumarin oo kasta oo la qorsheynayo in la fuliyo. Qiyaasaha waa in lagu soo gudbiyaa Doolarka Mareykanka (USD$).

## Taariikhaha muhiimka ah ee geeddi-socodka Miisaaniyadda 2022$^{ka}$

**31$^{ka}$ Agoosto 2021$^{ka}$** – maalinta ugu dambeysa ee qiyaasaha miisaaniyadda loo soo gudbinayo Waaxda Miisaaniyadda, Wasaaradda Maaliyadda

**20$^{ka}$ Sebtembar, 2021$^{ka}$** – Wasaaradda Maaliyadda ayaa mideyneysa qiyaasaha miisaaniyadda la soo gudbiyey

**10$^{ka}$ Oktoobar, 2021$^{ka}$** – Waaxda Miisaaniyadda ayaa la tashi la sameyneysa Wasaaradaha iyo Hay'adaha.

**15$^{ka}$ Oktoobar, 2021 $^{ka}$** – Miisaaniyad qabyo ah ayaa loo gudbinayaa Madaxweynaha iyo Golaha Wasiirrada

**31$^{ka}$ Oktoobar, 2021** – Miisaaniyadda soo jeedinta ah ayaa loo gudbinayaa Baarlamaanka

**30$^{ka}$ Nofembar, 2021$^{ka}$** – Wasaaradaha iyo Hay'adaha ayaa Qorshe-sanadeedyadooda Dakhligai iyo Kharashaadka u soo gudbinaya Wasiirka Maaliyadda (Waxaa lagu soo saarayaa tilmaan/amar kale).

**31$^{ka}$ Disembar 2021$^{ka}$** – Miisaaniyadda ayaa la ansaxinayaa

Qiyaasaha waxaa la soo gudbin karaa iyaga oo ah dokumenti kombuyutarka lagu diyaariyey (*soft copy* oo *Excel file* ah) ama waxaa lagu soo gudbin karaa iyaga oo waraaq ku qoran laakiin waa in ay leeyihiin qaabka loogu talogaley ee lagu soo gudbiyey Wareegtadan Miisaaniyadda.

**2. Dokumentiyada Miisaaniyadda ee la doonayo in la soo gudbiyo:**

Dokumentiyada miisaaniyadda ee ay Wasaaradaha iyo Hay'adaha u soo gudbinayaan Wasaaradda Maaliyadda waa:

**Foomka 1aad** – Qiyaasta dakhliga la filayo in Wasaaraddu Sameyso – **Lifaaqa 2aad**

**Foomka 2aad** – Qiyaasta kharashaadka soo noqnoqda – **Lifaaqa 3aad**

**Foomka 3aad** – Qiyaasta shaqaalaha. Faahfaahin ku aaddan Shaqaalaha Hadda u Shaqeeya iyo kuwa ay dooneyso in ay qorato Wasaaradda oo ay la socdaan jagada iyo darajada. – **Lifaaqa 4aad**

**Foomka 4aad**– Qiyaasta kharashka loogu baahan yahay in lagu soo iibsado hanti/qalab – **Lifaaqa 5aad**

**Foomka 5aad** – Kharashka Mashaariicda Horumarinta ee la doonayo in la fuliyo. Faahfaahinta mashaariicda la xiriira hantida ee ay Wasaaraddu dooneyso in ay fuliso. DHAMMAAN maaliyadaha laga helo deeq-bixiyeyaasha ee Wasaaraddu ku hesho Xisaabta Keliya ee Khasnadda iyo haddii cid 3aad ay soo martaba waa in lagu daraa – **Lifaaqa 6aad.**

**Foomka 6aad –** Codsiyada Kharashaadka Cusub oo ay lasocdaan faahfaahin ku aaddan kharashaadka cusub ee la soo jeedinayo, iyaga oo faahfaahin ka bixinaya sababta miisaaniyad dheeri ah loogu baahan yahay – **Lifaaqa 7aad.**

Qorshe-Sanadeed Dakhli & Kharashaad ayaa looga baahan yahay in lagu soo dhammeystiro **30 maalmood** gudahooda marka laga bilaabo goorta miisaaniyadda soo jeedint ah loo gudbiyo Baarlamaanka. Foomkan waxaa la dirayaa ugu dambeyn **10ka Novembar 2021** si ay u soo buuxiso Wasaarad iyo Hay'ad Kasta oo wax kharash-gareysa si ay ugu soo qoraan saadaal/odoros bileedkooda.

**3. Tilmaan-bixin la xiriirta sida loo diyaarinayo soo jeedinta Miisaaniyadda Sanad-maaliyadeedka 2022ka**

Wasaaraduhu waxaa ay soo jeedinta miisaaniyaddooda ku diyaarin karaan foomka daabacan waxaana ay u soo gudbin karaan Waaxda Miisiinyadda. Wasaaradda Maaliyadda ayaa macluumaadka gelinaysa dokumentiga kombuyutarka ee loogu talogaley (*spreadsheet*).

Haddii Wasaaraduhu ay doonayaan in ay foomamkooda buuxiyaan iyaga oo adeegsanaya dokumentiga kombuyutarka, markaa Wasaaradda Maaliyaddu waxaa ay siinaysaa faylal kombuyutar oo ay ku jiraan foomamka oo ku diyaarsan barnaamijka *excel.* Dokumentiyadu waxaa ay ku diyaarsan yihiin Afafka Soomaaliga iyo Ingiriisiga. Macluumaadka waxaa la gelin karaa oo keliya meelaha loogu talogaley ee midabkoodu jaallaha yahay. Foomka ayaa xisaabinayo tirooyinka waxaana ay natiijadu ka soo muuqaneysaa meelaha loogu talogaley ee midabka dambaska oo kale ah leh (*grey*).

**Foomka 1aad –Qiyaasaha Dakhliga Soo-noqnoqda – Lifaaqa 2aad**

Dhammaan dakhliyada iyo lacagaha ay hesho ama ay qaaddo **DGHSH** waa in lagu daraa qiyaasaha miisaaniyadda. Lacagaha lagu qaado cashuur ahaan- Lacagaha kastamada iyo lacagaha ay dad ka qaaddo dowladda. Marka la diyaarinayo qiyaasaha miisaaniyadda dakhliga Wasaaradda ayaa dib-u-eegis ku sameynaya si loo hubiyo in lagu daro dhammaan ilaha dakhliga ee ay hadda Wasaaraddu maareyso ama ay soo jeediso in ay maareyso sanad-maaliyadeedka. Qiyaasahani waxaa bixineysa Waaxda Dakhliga oo la tashaneysa hay'ad kasta oo dakhli qaadda.

Marka la filayo in uu si un u kordho dakhliga taas oo ka dhalatey koror ku yimid heerka nisbada la qaado, ama haddii uu kordho degaanka wax laga qaado, ama haddii Wasiir uu doonayo in uu bilaabo qaadista dakhli muddada miisaaniyadda, waa in faahfaahin buuxda laga bixiyaa nooca dakhliga la qaadayo waana in lagu daraa taariikhda la bilaabayo qaadista. Sida ay dhigeysso Qaybta 12(1)(c) ee Xeerka PFM waa in sharci sharxaya is-beddel kasta oo lagu sameeyo shuruucda siyaasadda cashuurta iyo dakhliga aan cashuurta ahayn, waa in la soo bandhigaa ugu dambeynta taariikhda qiyaasaha miisaaniyadda loo gudbinayo Baarlamaanka.

Marka faahfaahinta halka uu dakhli ka imaanyo aan lagu darin qoraallada diyaarsan ee miisaaniyadda waa in tilmaan buuxda laga bixiyaa isha dakhliga si markaa sumadda ku habboon dakhliga gaarka ah loogu qoondeeyo.

Ilaha dakhliga ee ay Wasaaraduhu mas'uul ka noqon karaan waxaa ka mid ah:

- Canshuuraha isticmaalka alaabooyinka ama ruqsadda isticmaalka alaabo.
- Deeqo laga helo Ururro/Hay'ado Caalami ah ama hay'ado kale
- Dakhli kiro/ijaar ah
- Ujuurooyinka hawlaha maamulka
- Ganaaxyada

Si aad u buuxiso Foomka 1aad

- Geli magaca Wasaaradda
- Geli sumadda la siiyey Wasaaradda. Sumadaha la siiyey Wasaaradaha waxaa ay ku qoran yihiin Lifaaqa 1aad.
- Dhammaan ilaha dakhliga ay Wasaarad ama Hay'ad/Wakaalad ay hadda maareyso ama ay soo jeedinayso in ay maareyso muddada miisaaniyadda Sanad-Maaliyadeedka **2022** waa in lagu qoraa Foomka 1aad iyada oo mid kasta lagu qorayo halka u habboon nooca ay tahay. Haddii noocaas dakhliga aan lagu xusin foomka, faahfaahinta ku qoran halka ay ku qoran tahay 'dakhli kale' oo faahfaahintana u soo gudbi Wasaaradda Maaliyadda.
- Nooc kasta oo ka mid ah dakhliga geli xaddiga lacagta laga filayo in la soo ururiyo muddada u dhaxaysa **1$^{da}$ Jannaayo – 31$^{ka}$ Disembar 2022**.

**Foomka 2aad–Qiyaasaha Kharashaadka Soo-noqnoqda (Hawlgallada) – Lifaaqa 3aad**

Kharashka soo noqnoqda waa kan loogu baahan yahay socodsiinta hawlaha Wasaaradda si ay uga soo baxdo hawl-maalmeedkeeda taas oo ku saleysan in aaney wax iskabeddelin doorka ama hawsha ee sanadaha kala duwan. Qiyaasaha sanadlaha ah waa in ay ku dhisnaadaan xaqiiqo waana in ay ahaadaan kharashka dhab ahaan ku baxa hawlgelinta Wasaaradda iyada oo mudnaan la siinayo ujeeddooyinka Wasaaradda ee sanad-miisaaniyadeedkaan. Kharashka waa in uusan ka badnaan halka ugu badan ee la gaarsiin karo ee ku tilmaaman **Lifaaqa 1aad.** Caddadka lacagta ayaa loo kala qoondeyn karaa sumadaha kala duwan ee qaybaha miisaaniyadda. Kharash kasta oo aan lagu sii talogalein waa in lagu faahfaahiyaa **Foomka 6aad.**

Haddii qiyaaso miisaaniyadeed la soo gudbiyo iyaga oo la doonayo in lagu bixiyo kharashka waxyaabo hanti ah (*capital items*), kharashka soo noqnoqda ee lagu dayactirayo hantidaas raasamaalka ah waa in lagu daraa miisaaniyadda. Tusaale ahaan, haddii la soo iibsanayo daabace (*printer*) uu u baahan yahay miisaaniyad lagu soo iibsado waraaqo iyo khadda daabacaha, haddii soo-iibsashada gaari ay u baahaneyso miisaaniyad loogu iibiyo shidaal.

Kharashka soo noqnoqda waa kan loogu baahan yahay in Wasaaraddu shaqeyso si ay u qaban karto hawl-maalmeedkeeda. Kharashka soo noqnoqda waxaa ka mid ah:

- Ujuurooyinka iyo mushaaraadka shaqaalaha iyo gunnooyinka kale ee la siiyo shaqaalaha
- Kharashaadka la xiriira hawlaha, tusaale ahaan kharashaadka khadamaadka (sida korontada iyo biyaha), safarrada, ama agabka iyo sahayda loo baahan yahay.

*Kharashaadka ujuuurooyinka iyo mushaaraadka*

Qiyaasta miisaaniyadda Ujuurooyinka iyo Mushaaraadka shaqaalaha rayidka ah ee dowladda iyo shaqaalaha kale ee maaliyadda ka hela dakhliga Dowladda ee la gelinayao **Foomka 2aad** waxaa lagu xisaabinayaa **Foomka 3aad** dhexdisa waxaana loo xisaabinayaa si ku saleysan jagooyinkii shaqada loo qaatey sanadkii la so dhaafey. Jagooyinka ay maalgeliso miisaaniyadda RCRFIII ee uu ansaxiyey Bankiga Adduunka waxaa la gelinayaa foomka 5aad (*Kharashka Mashaariicda Horumarinta).* Eeg tilmaamaha lagugu siiyey xagga hoose ee sharxaya sida loo buuxinayo **Foomka 3aad**.

*Kharashaadka kale ee hawlaha*

**Foomka 2aad** ayaa taxaya kharashaadka loogu baahan karo sidii ay Wasaaraddu hawlaheeda u gudan lahayn. Fadlan soo sheeg qiyaasaha xaddiga lacagta aad ugu baahan karto qaybahan muddada toban iyo labada bilood ah ee u dhaxaysa Jannaayo ilaa Disembar **2022ka**.

Si aad u buuxiso Foomka 2aad.

- Geli magaca Wasaaradda
- Geli sumadda la siiyey Wasaaradda. Sumadaha Wasaaradaha kala duwan waxaa lagugu siiyey Lifaaqa 1aad
- Geli lacagta lagu xisaabiyey Foomka 3aad dhexdiisa (eeg xagga hoose) kaas oo la xiriira Ujuurooyinka iyo Mushaaraadka ee nooc kasta oo shaqaalaha ka mid ah oo lagu taxay foomka.
- Geli tirada lacagta la qiyaasayo in loo baahdo sanadka **2022ka** ee waxyaabaha kharashku ku baxo ee ku taxan Foomka A. Keliya qaar ka mid ah waxyabahaas ayaa loo baahan doonaa. Kuwa kale sidooda ha u bannaanaadaan.
- Geli tirada lacagta la saadaalinayo in waxyaabahaas loogu baahdo inta lagu jiro Sanad-Maaliyadeedka **2022ka.**

**Foomka 3aad– Qiyaasaha kharashaadka shaqaalaha – Lifaaqa 4aad**

Si loo ogaado miisaaniyadda ujuurooyinka iyo mushaaraadka ee lagu diyaarinayo **Foomka 2aad**, waa in faahfaahinta jagooyinka marka hore la geliyaa **Foomka 3aad**. Macluumaadka ku saabsan bixinta mushaaraadka ama gunnooyinka ee la siinayo Wasiirrada iyo kuwa kale ee loo magacaabo jagooyinka siyaasadeed iyo kuwo sharcigu tilmaamayo waa in sidoo kale looga soo warbixiyaa foomkan.

Wadarta kharashka mushaaraadka ee dhammaan jagooyinka lagu taxay **Foomka 3aad** waa in lagu muujiyaa miisaaniyadda ujuurooyinka iyo mushaaraadka ee **Foomka 2aad** iyo **Foomka 5aad** ee jagooyinka maaliyadda ka hela mashruuca RCRFIII. Faahfaahinta iyo miiisaaniyadda shaqaalaha maaliyadda ka hela RCRFII waxaa bixin doona Unugga EAFS si ku fadhida miisaaniyadda uu ansaxiyey/loo gudbiyey BankigaAdduunka.

**Si aad u buuxiso Foomka 3aad:**

- Geli Magaca Wasaaradda
- Geli sumadda la siiyey Wasaaradda. Sumadaha Wasaaradaha kala duwan waxaa lagugu siiyey Lifaaqa 1aad.

**Qaybta 1aad** ee foomka, ku tax shaqaalaha uu magacaabey ama la filayo in uu magacaabo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee **DGHSH** ka hor **31ka Disembar 2022ka**, ama sanadka **2021ka** gudihiisa. Shaqaalahan waxaa ay lahaan doonaan lambarka jagada iyo darajada shaqaalaha rayidka ah ee dowladda, waxaana ay qaadan doonaan mushaaraadka la ansaxiyey ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Qaybtan foomka ka mid ah waa in lagu qoraa keliya shaqaalaha uu ansaxiyey Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda / Maamulka, ama uu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ku taliyey in la magacaabo. Haddii aaney waraaqdu ku filnayn in lagu qoro dhammaan jagooyinka shaqaalaha rayidka ah ee la soo jeedinayo in la qaato, ku soo lifaaq liis ay ku qoran yihiin faahfaahinta loo baahan yahay (ama jiif-u-taxyo ku daro dokumentiga kombuyutarka ee *spreadsheet*-ka ah).

Mid kasta oo ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda/Maamulka:

- Qor lambarka jagada ee uu u qoondeeyey Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
- Qor Magaca Jagada ee uu u ansxiyey Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
- Haddii jagada waqtigaan cid loo qaatey, qor magaca qofka loo qaatey jagada. Haddii jagada aan weli cid loo qaadan, wax ha ku qorin oo sideeda u daa.
- Qor darajada uu jagadan siiyey Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
- Qor heerka tallaabada mushaarka ee u habboon qofka haya jagadan. (Sanadka **2022ka** dhammaan shaqaaluhu waxaa ay ku jiraan heerka tallaabada 1aad ee darajadooda.)
- Qor mushaarka darajada iyo heerka tallaabada ee waafaqsan wareegtada Mushaarka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda/Maamulka (marka ay ansaxiyaan Golaha Wasiirrada).
- Qor tirada bilaha buuxa ee qofkaa shaqaalaha ah uu ka shaqeynayo muddada u dhaxaysa Jannaayo – **Disembar 2022ka**. (Ugu badnaan waa 12 bilood)
- Shaqaalaha rayidka ah ee dowladda, joog-u-taxa tirada shaqaalaha waxaa lagu qorayaa 1. Wadarta mushaarka ee qof kasta qaadanayo sanadka **2022ka** ayaa la xisaabinayaa.
- Intaa ka-dib qor tirada bilaha ee qofka la filayo in uu ka shaqeeyo muddada sanad-maaliyadeedka **2022ka**. Tirada bilaha lagu qorayo waa in ay ka muuqataa taariikhda loo maleynayo in qofkaa shaqaalaha ee la doonayo uu bilaabo shaqada, ugu badnaanna waa **12** bilood.

**Qaybta 2aad** ee foomka ku qor faahfaahinta noocyada kale ee shaqaalaha iyo mushaaraadka kale ee la bixiyo oo ay ka mid yihiin:

Shaqaalaha Qandaraas Ku Joogga ah
Shaqaale Ujuuro Ku Shaqeeya
Shaqaale waqti gaaban shaqeeya (oo aanu weli magacaabin Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda/Maamulka)
Shaqaalaha bixiya adeegyada amniga (booliska, mileteriga, ilaalada xabsiyada)
Mushaaraadka Wasiirrada iyo Saraakiisha Kale ee Dowladdu Magacowdo.

Haddii uusan foomku ku filnayn, ku soo lifaaq liis ay ku qoran tahay faahfaahinta loo baahan yahay (ama jiif-u-taxyo ku dar dokumentiga kombuyutarka ee *spreadsheet*-ka ah).

Nooc kasta oo shaqaale ah, iyo jago kasta,

- Qor lambarka jagada ee uu u qoondeeyey Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
- Qor Magaca Jagada ee uu u ansxiyey Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
- Haddii jagadu ay mid keliya tahay oo qofna loo qaatey, qor magaca qofka loo qaatey jagada.
- Qor mushaarka lagu bixinayo jagada
- Qor tirada bilaha jagadaas mushaar lagu bixinayo sanadka **2022ka**. (Ugu badnaan waa 12 bilood)
- Haddii wax ka badan hal qof ay ku shaqeynayaan jagadan qor tirada dadka jagadan loo qaatey.
    - Tusaale ahaan, haddii 10 qof oo ilaaliyeyaal dhinaca amniga ah loo qaatey shaqaale ujuuro ku shaqeeya oo isku mushaar ah markaa geli faahfaahinta shaqaalaha nooca  211103 Shaqaale Ujuuro ku Shaqeeya oo tiradana geli 10.
- Ka-dib qor tirada bilaha ee qofka la filayo in uu ka shaqeeyo muddada sanad-maaliyadeedka **2022ka**. Tirada bilaha lagu qorayo waa in ay ka muuqataa taariikhda loo maleynayo in qofkaa shaqaalaha la doonayo uu bilaabo shaqada, ugu badnaanna waa **12 bilood**.

**Foomka 4aad–Kharashka Hantida Raasamaalka ah – Lifaaqa 5aad**

Qorsheynta waxqabadyada iyo arrimaha mudnaanta u leh Wasaaraddaada ee muddada miisaaniyadda ayaa gacan ka geysaneysa ogaanshaha kharashka hantida raasamaalka ah ee loo baahan yahay. Marka la soo gudbinayo qiyaasaha miisaaniyadda ee hantida raasamaalka ah waa in lacag kasta oo lagu talinayo in lagu bixiyo soo iibsashada hanti raasamaal ah, sida qalab, qalabka guryaha iyo xafiisyada *furniture*) waa in lagu daraa qiyaasaha kharashaadka hntida raasamaalka ah ee **Foomka 4aad.** Haseyeeshee, haddii soo iibsashada hantida raasamaalka ah ay ku jirto miisaaniyadda horumarinta (**Foomka 5aad)** waa in *aan* lagu darin qiyaasaha kharashaadka hantida raasamaalka ah ee **Foomka 4aad.**

Kharashka Hantidu waa qiimaha ku baxa soo gadashada hanti sida kombuyutarrada, birintarrada, qalabka iyo alaabada xafiisyada iyo baabuurta.

*"Hanti Raasamaal ah*" waxaa loola jeedaa wax dhab ahaan muuqda ama la taaban karo oo leh tilmaamahan:

- Qiime la mid ah ama ka badan halka ugu hooseysa ee lagu qiimeeyo hanti, sida ay tilmaameyso Qaybta 1.4 ee Xeer-nidaamiyahan; Xeer-nidaamiyahan waxaa uu u habboon yahay dhammaan hantida halkii shey uu qiimihiisu yahay $200 ama ka badan.
- Gacanta ugu jirta ama ay leedahay **DGHSH**, iyo
- Qiyaasta isticmaalkiisu ay ka badan tahay hal sano oo laga soo bilaabo marka la soo iibsado.

Ogow: Marka ay ujeeddooyinku la xiriiraan miisaaniyad iyo ka-warbixinteeda. Hantida Raasamaalka ah waxaa ay isku macne yihiin Hantida Ma-guurtada ah sida uu dhigayo Buugga Istaatistikooyinka Maaliyadeed ee Dowladda/*Goverment Financial Statitiscs Manual* ee 2014kii oo miisaaniyaddiisa lagu sameeyo lana geliyo Summadda Jadwalka Xisaabta ee Hantida Ma-guurtada ah ee *Fixed Asset GFS Chart of Account Code* ee 311xxx *(eeg Xeer-nidaamiyaha #2 – Abuurista Qaab-dhismeedka Baadi-sooca Miisaaniyadda ee Miisaaniyad-*

*diyaarinta & Fulinta* si aad uga eegto munaaqasho ku saabsan sumadaha Jadwalka Xisaabaadka –*Chart of Account codes*). Dhammaan hantida noocaas ah waa in la geliyaa diiwaanka dhexe ee Hantida Raasamaalka ah.

Hantida halkii shey uu qiimihiisu ka yar yahay $200 lama gelinayo diiwaanka dhexe ee *Capital ASset Register* waxaana miisaaniyad loogu sameynayaa loona bixinayaa sidii *Isticaalka Alaabo iyo Adeegyo*, taas oo hoos imaaneysa Jadwalka Xisaabta ee *GFS Chart of Account code 22xxxx* (eeg Xeer-nidaamiyaha #2 – *Abuurista Qaab-dhismeedka Baadi-sooca Miisaaniyadda ee Miisaaniyad-diyaarinta & Fulinta* si aad uga eegto munaaqasho ku saabsan sumadaha Jadwalka Xisaabaadka –*Chart of Account code* iyo sidoo kale Wareegtada Miisaaniyad-sanadeedda, qaybta 3aad, Foomka 4aad si aan munaaqasho dheeri ah uga hesho).

Faahfaahin buuxda oo la xiriirta hantida la doonayo in la soo iibsado **2022[ka]** waa in lagu soo qoraa **Foomka 4aad** si ay u tixgeliyaan Golaha Wasiirrada.

Si aad u buuxiso Foomka 4aad:

- Geli magaca Wasaaradda
- Geli sumadda loo qoondeeyey Wasaaradda. Summadaha loo qoondeeyey Wasaaradaha waxaa ay ku qoran yihiin **Lifaaqa 1**.
- Haddii Wasaaraddu ay soo jeedineyso in ay soo iibsato qalab hanti ah waa in faahfaahinta mid walba oo ka mid ah hantidaa lagu soo qoraa halka ku habboon nooca uu yahay. Qor faahfaahinta shey kasta, qiimaha la qiyaasayo in lagu soo iibsanayo sheyga, iyo tirada inta xabbo ee la rabo in la soo iibsado.

Hantida la soo iibsanayo waa in marka la gudbinayo miisaaniyadda loo sameeyaa qiil faahfaahin buuxda ka bixinaya sababaha loogu darayo kharashka hantida

**Foomka 5aad–qabyo-qoraalka Mashaariicda Horumarinta – Lifaaqa 6aad**

Mashaariicda Horumarintu waa hawl maalgelin hanti leh muddo go'an oo ay soconeyso oo marka la dhammeeyana, ka mid noqoneysa hantida la taaban karo ama kartida dowladda. Waxaa ka mid ahaan kara lacag lagu bixiyey in la soo iibsado ama la sii wanaajiyo hantida sida dhismayaasha iyo waxyaabo waaweyn oo ka mid ah qalab. Mashaariicda horumarinta badidoodu waxaa maalgeliya deeq-bixiyeyaal laakiin waa in ay oggolaataa ayna xiriirisaa dowladda. Mashaariicda horumarintu waxaa sidoo kale ka mid ahaan kara mashaariic lagu tilmaami karo kuwo soo noqnoqda, sida, dayactirka dhismayaasha, maaliyad-siinta taageerada kharashaadka soo noqnoqda (RCRFIII).

Mashaariicda horumarinta ee RCRFIII, lacagta miisaaniyadda lagu darey ee **Foomka 5aad** waxaa laga soo qaatay **Foomka 3aad,** qiyaasaha kharashaadka shaqaalaha.

Kharashaadka RCRFIII ee mushaaraadka ahayn ee soo noqnoqda waa in lagu daraa laguna saleeyaa maaliyadsiinta uu ansaxiyey Bankiga Adduunka.

Si ay mashaariicdaasi u ahaadaan kuwo dhaqaale ahaan is-bixiya ayna u ahaadaan kuwo ay fududdahay in lagu fuliyo waqtigii loogu talogaley, waxaa carrabka lagu adkeeyey in mashaariicdaasi ay waajib tahay in ay ahaadaan kuwo si ku filan loo qorsheeyey. Faahfaahinta mashruuca horumarinta ee la xiriirta ujeeddooyinka, natiijooyinka, waqtiyada iyo qiil-u-sameynta mashruuca ayaa ay tahay in lala gudbiyo miisaaniyadda si ay taasi Golaha Wasiirrada

gacan uga siiso in ay go'aamiyaan mudnaanta guud ee mashruuc kasta oo loogu soo gudbiyey in ay tixgeliyaan. Intaa waxaa dheer, in si habboon loo qorsheeyo mashruuca ka hor inta aan la bilaabin waxaa ay muhiim u tahay in si habboon loo fuliyo mashruuca waxaana ay dad u oggolaaneysa in la korjoogteeyo horumarka mashruuca muddada uu socdo mashruucu. Iyada oo lagu xisaabtamayo nooca mashaariicda horumarinta ayaa laga yaabaa in ay habboon tahay in Wasaaradaha ay dalbadaan in ay gacan ka helaan deeq-bixiyeyaal ama NGO-yo marka ay diyaarinayaan soojeedin, gaar ahaan dhinaca ogaanshaha qiimaha uu ku kacayo.

Mashaariicda horumarinta waxaa maalgelin kara deeq-bixiyeyaasha iyaga oo ah deeqo ay "Cid 3aad Toos U Bixinayso". Tani waxa uu macnaheedu yahay in deeq-bixiyuhu uu si toos ah u maalgelinayo mashruuca oo maaliyadduna aaney soo mareynin xisaabta Waaxda Khasnadda ee HSS. Dhammaan mashaariicda ay deeq-bixiyeyaal maalgeliyaan waa in lagu qoraa **Foomka 5aad** waana in lagu daraa miisaaniyadda la gudbinayo.  Haddii ay Wasaarad dooneyso in ay soo jeediso Mashruuc Horumarin oo ay maalgeliyaan deeq-bixiyeyaal, ama ay haddaba ogtahay deeq-bixiye doonaya in uu maalgeliyo Mashruuc Horumarin, faahfaahinta loo baahan yahay waa in lagu soo gudbiyaa **Foomka 5aad**. Foom u gaar ah waa in loo diyaariyaa mashruuc kasta.

**Foomka 5aad** ee la socda qaababka diyaarsan ee miisaaniyadda waa in uu bixiyaa faahfaahin dad ugu filan diyaarinta mashruuca waxaana ay tahay in faahfaahintaas ay ka mid ahaadaan:

1) **Ujeeddooyinka:** Sheeg ujeeddooyinka mashruuca iyo waxa uu mashruucu xaqiijinayo iyo cidda ka faa'iideysaneysa mashruuca. Intii suuragal ah, ahdaafta (hadafyada) la higsanayo waa in sida ugu cad ee suuragalka ah loo sheegaa si ay taasi u keento in la dejiyo bartilmaameedsiyo la xiriira oo sida hawsha looga soo baxay lagu ogaan karo. (t.a. hadaf gaar ah oo lagu doonayo in lagu sii wanaajiyo waddooyinka ay maraan bulshooyinka beeraleyda ayaa lagu qiimeyn karaa kororka wax-soo-saarka iyo dakhliga ay bulshadaa ay ka heleyso waddadaa la hagaajiyey). Sharax halka ay suuragal tahayn oo tiro ahaan u sheeg faa'iidooyinka dhaqaale, bulsho, maamul ama faa'iidoohinka kale ee ay u badan tahay in laga helo mashruuca. Si cad u sheeg waxyaabaha lagu xisaabtamey ee salka looga dhigey qiyaasaha wax-soo-saarka mashruuca. Faa'iidooyinka laga helayo ma u qalmaan kharashka ku baxaya?
2) **Waxqabadyada:** Si cad u sharax magaca iyo waxqabyada mashruuca iyo sida uu ku xaqiijinayo ujeeddooyinka sida gaarka ah loo cayimey. Haddii ay jiraan tiro waxqabad-hoosaadyo kala duwan (t.a. dhisid, tababar dhinaca fidinta ah iwm.) oo ku wada jira mashruuca, sharax mid kasta oo muuji sida ay u wada xiriiraan. Sharaxaaddu waa in ay sheegtaa cabbirka, goobta, gashiga loo baahan yahay, marxaladaha iyo qaababka kala duwan ee uu maray wax-soo-saarka iyo natiijooyinka laga filayo.
3) **Muddada:**  Sheeg taariikhda la filayo in uu bilowdo iyo in uu dhammaado mashruuca. Waxaa muhiim ah in la hubiyo in maamul ahaan iyo farsamo ahaanba ay suuragal tahay in la bilaabo lana dhammeystiro mashruuca waqtiga loo qoondeeyey. Muddada uu soconayo mashruuca waa in ay xaqiiqda ku dhisnaataa ayna ahaataa mid la xaqiijin karo ayna ku xisaabtantaa gaabiska yar ee ka dhasha daahitaannka yar ee ay keenaan xaalado aan lagu sii xisaabtamin.
4) **Goobta:** Muuji gobolka ama degaanka mashruuca laga fulinayo iyo meelaha faa'iidooyinkiisa lagu xaqiijin doono.
5) **Qorshaha iyo Waqtiga Hirgelinta**: Sheeg waqtiga iyo hay'adda fulineysa waxqabadyada kala duwan ee mashruuca. Xaqiiji kartida (awoodda) ay Wasaaraddu u leedahay hirgelinta mashruuca, ama gargaar dibadeed oo noocee ah ayaa ay u baahan tahay. Soo koob waxyaabaha lagu ogaadey cilmi-baaris kasta oo horey loogu sameeyey

baahida iyo suuragalnimada mashruuca. Bixi waqtiyada la qabanayo hawlaha ugu waaweyn (waqtiga la filayo in uu mashruucu bilowdo iyo waqtiga uu dhammaanayo, ahdaafta la doonayo in la xaqiijiyo iwm.) ee la xiriira hirgelinta waxqabadyada kala duwan. Sharax sida mashruucu uu xiriir ula leeyahay mashaariicda kale ee socda iyo kuwa la soo jeediyey in la hirgeliyo. Mar kasta oo ay u habboon tahay raaci faallo ay bixiyeen Wasaarado ama Hay'ado kale oo ku hawlan waxqabadyadan la xiriira. Ku dar tilmaan kooban oo aad ka bixineyso habraacyada loo marayo korjoogteynta hirgelinta mashruuca.

6) **Wadarta Kharashka uu ku Kacayo:** Ku dar keliya kharashaadka tooska ula xiriira hab-sami u fulinta waxqabadyada iyo ujeeddooyinka lagu sheegey soo-jeedinta (boroboosalka) mashruuca. Kharashaadka kale ee xiriirka la leh waa in laga raadiyaa ilo kale. Miisaaniyaddu waa in ay ahaataa mid xaqiiqada jirta ku xisaabtameysa. Soo ogow lacagta dhab ahaan ku baxaysa waxqabadyada la qorsheeyey, oo niyadda ha gashanin in aad awoodi doonto in aad ku qabato lacag intaas ka yar. Miisaaniyadda waa in ay ku jiraan dhammaan kharashaadka la xiriira maareynta iyo maamulidda mashruuca. Si gaar ah, ku dar kharashka ku baxaya korjoogteynta iyo qiimeynta mashruuca.

Wasaaradda Maaliyadda ayaa Mashruuc kasta siineysa Lambar u gaar ah.

Si aad u buuxiso Foomka 5aad:

- Qor magaca Wasaaradda.
- Qor Magaca Mashruuca. Magacu waa in uu si cad u tilmaamaa mashruuca
- Calaamadi khaanadda si aad u sheegto in uu mashruucu yahay Mid Cusub ama Mid Socda. Sanadka **2022**[ka] dhammaan mashaariicdu waxaa ay ahaanayaan kuwo cusub (yacni kuwo la soo jeedinayo).
- Calaamadi khaanadda si aad u sheegto in mashruucu yahay mid laga maalgelinayo miisaaniyadda **HSS** ama uu maalgelinayo deeq-bixiye yacni 'Cid 3aad ay Toos u Maalgelineyso'. (Sanadka **2022**[ka] mashaariicda la xaqiijiyo in ay maalgelinayaan deeq-bixiyeyaasha ayaa la tixgelin doonaa.)
- Haddii deeq-bixiye uu bixinayo maaliyadda geli faahfaahinta halka maaliyadaha lagu ridayo. Sida in lagu ridayo TSA ama xisaab banki oo gaar ah.
- Haddii deeq-bixiye loo soo heley (ogaadey) mashruuca waa in magaca deeq-bixiyaha la soo sheegaa (t.a. Sanduuqa *Somalia Stability Fund*)
- Qaybta 1aad ku qor macluumaad ku saabsan ujeeddooyinka mashruuca
- Waxqabadyada mashruuca ku sharax Qaybta 2aad
- Qaybta 3aad ku sheeg taariikhaha la filayo in la bilaabo iyo in uu dhammaado mashruuca
- Qaybta 4aad ku sheeg degaanka ugu weyn ee mashruuca laga fulinayo.
- Qaybta 5aad ku sharax qorshaha hirgelinta iyo waqtiga la doonayo in lagu hirgeliyo mashruuca.
- Qaybta 5aad ku faahfaahi kharashaadka ku baxaya mashruuca adiga oo u taxaya si waafaqsan nooca kharashka iyo summadda u habboon. Summadda nooc kasta oo kharash ah waxaa laga helayaa Shaxda Xisaabaadka (*Chart of Accounts*)

- Tusaale ahaan, mashruuc lagu dhisayo dhismayaal xafiis waxaa uu kharashka ku baxaya dhismaha ku sumadinayaa sumadda 311121 Dhismooyin Aan Degaan Ahayn.
- Qiyaasta kharashka uu ku kacayo mashruuca waa in uu ku jiraa kharashka ku baxaya qalabka hantida ah ee xiriirka la leh sida qalabka/alaabada xafiisyada (miisaska iyo kuraasta iwm)

- Qaybta 5aad waa in sidoo kale lagu muujiyaa caddadka maaliyadda uu deeq-bixiyuhu ku bixinayo mashruuca.

**Fooomka 6aad** – Codsiyada Kharashaadka Cusub – Maaddaama miisaaniyadda hore ee la gudbinayo ay tahay in la diyaariyo iyada oo an la dhaafsiineynin halka ugu badan ee loo qoondeeyey miisaaniyadda taas oo ku saleysan kharashaadkii sanadkii kaa ka horreeyey, ayaa Wasaaradaha qaar sii qiyaasayaan in kharashaad kale loogu baahanayo hawlaha iyo ujeeddooyinka kordhey.

Si aad u buuxiso Foomka 6aad:

- Geli magaca Wasaaradda
- Tilmaanta kharashka
- Sumadda miisaaniyadeed
- Caddadka kharashka miisaaniyadda ee sanadka
- Kala mudnaansiinta 1 – 5. Iyada oo 1 ay tahay waa mid mudnaan leh. Tani waxaa ay Waaxda Miisaaniyadda u oggolaaneysaa in ay u habeyso sida ay isugu xigxigaan dhammaan codsiyada iyada oo la ogyahay in maaliyadda Dowladdu ay xaddidan tahay
- Faahfaahinta – qiil u sameyneysa codsiga kharash-bixinta ee cusub

Shaqaalaha

- Jagada – jagada cusub. Tani waa in uu ansaxiyaa Guddiga CSC
- Heerka – heerka jagada
- Kharashka miisaaniyadda ee sanadka
- Mudnaanta. 1 – 5. Iyada oo 1 ay tahay waa mid mudnaan leh. Tani waxaa ay Waaxda Miisaaniyadda u oggolaaneysaa in ay u habeyso sida ay isugu xigxigaan dhammaan codsiyada iyada oo la ogyahay in maaliyadda Dowladdu ay xaddidan tahay

Macluumaad dheeri ah:

- Faahfaahin dhammeystiran oo u qiil-bixisa codsiga kharash-bixinta cusub. Sida lagu go'aansadey miisaaniyadda. Sida, tirada bilaha qofka shaqaalaha ah miisaaniyad loogu talogaley. Hadba inta uu ka sii badan yahay macluumaadka la bixiyo ayaa ay ka sii wanaagsan tahay taageeridda la taageerey codsiga
- U-qiilbixinta lagu taageerayo codsiga kharash-bixinta cusub. Tani waa in ay waafaqsan tahay ujeeddooyinka iyo arrimaha mudnaanta u leh Wasaaradda

# Lifaaqa 1aad:  Sumadaha Wasaaradaha

| Tirada | WW&W | Xadidaada Miis 2022 |
|---|---|---|
| 01 | Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Garsoorka | 110,000 |
| 02 | Wasaaradda Xanaanka xoolaha, Dhirta iyo Daaqa | 110,000 |
| 03 | Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka badda | 110,000 |
| 04 | Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga | 110,000 |
| 05 | Wasaaradda Boostada, Isgaarsinta iyo Teknologiyada Casriga | 110,000 |
| 06 | Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | 1,909,882 |
| 07 | Wasaaradda Ilaalinta Bay'ada Dhulka iyo Badda | 110,000 |
| 08 | Wasaaradda Beeraha & Waraabka | 110,000 |
| 09 | Wasaaradda Caafimadka iyo Daryeelka Bulshada | 4,987,768 |
| 10 | Wasaaradda Kalumesiga & Kheyraadka Badda | 110,000 |
| 11 | Wasaaradda HawlahaGuud Iyo Dib-U-Dhiska | 110,000 |
| 12 | Wasaaradda Warfaafinta, Hiddaha iyo Dhaqanka | 110,000 |
| 13 | Wasaaradda Arrimaha Gudaha Iyo Dawladaha Hoose | 4,929,800 |
| 14 | Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Iskashiga Caalamiga | 110,000 |
| 15 | Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka | 110,000 |
| 16 | Wasaaradda Amniga iyo Dhaqancelinta | 4,900,901 |
| 17 | Wasaaradda Shaqada & Shaqaalaha | 110,000 |
| 18 | Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 1,152,084.64 |
| 19 | Wasaaradda Dasturka & Arrimaha Federaalka | 110,000 |
| 20 | Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha | 110,000 |
| 21 | Wasaaradda Hawenka & Xuquuqul Insanka | 110,000 |
| 22 | Wasaaradda Biyaha, Tamarta, iyo Macdaanta | 110,000 |
| 23 | Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta musiibooyinka | 110,000 |
| 24 | Hafiska Shaqada iyo Shaqaaleynta | 139,964 |
| 25 | Barlamanka Gobledka ee Hirshabele | 3,902,790 |
| 26 | Wasaarada Madaxtooyada | 1,799,549.35 |
| 27 | Xafiska Hanti Dhowrka Guud | 110,000 |
| 28 | Wasaaradda Dhaqancelinta & Hub-kadhigista | 110,000 |
| 29 | Wassaradda Diinta & Awqaafta | 110,000 |
| 30 | Wasaaradda Batroolka & Macdanta | 110,000 |
| 31 | Wasaaradda Dib-uheshiisiinta & Dib-udajinta | 610,000 |
| | **Isku geynyta Xididaada Miis 2022** | **$26,059,755** |

**FG:**

Hoos waxaad ku arki doontaan forms-ka lasoo buuxinayo oo u ulifaaqan hab Kalaha Horayn ah. Wixii caawimaad ah eed ubaahato waxaad laxidhiidhi Waaxda Miisaaniyada ayaga ayaa kuhagaya/kucaawini.

**Annex 2: Form1**

2022, 2B Expenditure Form H

**Annex 3: Form 2**

2022, 1A Rev Form HSS MoF FINAL.xlsx

**Annex 4: Form 3**

2022, 3 Employee Form HSS.xlsx

**Annex 5: Form 4**

2022, 4 Capital Form HSS.xlsx

**Annex 6: Form 5**

2022, 5 Development Projec

**Annex 7: Form 6**